

# WAJAHIDA GURI KA SAARID

## CODSO KAALMO

1.

Tag barta interneedka **STOPMYEVICTION.ORG** Haddii aad leedahay kiis maxkamadeed oo guri ka saarid ah, Guji SANDUUQ CAGAAR AH si aad u buuxiso codsiga kaalmada. Wac lambarka **833-597-3687** si aad u hesho hagitaan dheeraad ah.

## WAC KAALMADA SHARCIGA AH (LEGAL AID)

2.

**(502) 584-1254**

Legal Aid waa adeeg lacag la'aan ah si uu kaagala taliyo xuquuqdaada sharciga ah oo uu kuugu matalo maxkamadda guri ka saaridda. Haddii aad tahay qof dakhligiisu hooseeyo oo aad leedahay canug ku nool gurigaaga, waxaa laga yaabaa in lagu dammaanad qaado wakiilasho sharci ah.

3.

## KA QAYB GAL DHAGEYSIGA DACWAD MAXKAMADEED

Waa MUHIIM inaad ka soo qaybgasho dhageysiga maxkamadeed ee guri ka saarista si loo ilaaliyo xuquuqdaada. Maxkamadda waxaad ku baran doontaa xaaladda codsigaaga kaalmada kirada, waxaad ku xirnaan doontaa qareennada iyo ilaha Kaalmada Sharciyadeed, oo waxaad raadin doontaa wakhti dheeraad ah si aad arrimaha ula xalliso milkiilaha gurigaaga. Maxkamadda waxa lagu qabtaa muuqaal ahaan (Zoom) ama qof ahaan. (Fiiri dhinaca dambe ee Qoraalka-Warqaddeed.)

### MAGACA:

### DHAGEYSIGA MAXKAMADEED EE GURI KA SAARIDAADA

### WAA:



**COALITION**  
FOR THE  
**HOMELESS**

# Ka qaybgal Maxkamadda Guri Ka saarida Degmada Jefferson adigoo adeegsanaya Muuqaalka Zoom ama Qof ahaan

## **MACLUUMAADKA GELITAANKA MAXKAMADDA MUUQAALKA**

Ku gal maxkamadda kombiyuutarka, tablet-ka, telefoonka gacanta ee casriga ah, ama wicitaan telefoon.\*

- ku soo biir muuqaal ahaan fiidiyo appka Zoom:
  - Lambarka Aqoonsiga Kulanka Zoom: 789 335 2944
  - Erayga Sirta ee gelitaanka (Password): 308
- Ku soo biir telefoon: Garaac lambarka 1-312-626-6799
- Kor ka fiiri macluumaadka kulanka Zoom

Waxaad u baahantahay helitaanka kombiyutar ama caawimaad? Wac lambarka **(502) 574-1707**

**HAGAHA  
TALAABO-  
TALAABO**



**\*Haddii aad u baahan tahay inaad ballansato adeegyada tarjumaanka taariikhda maxkamaddaada, Soo wac: 502 584 1254**

## **MACLUUMAADKA MAXKAMADDA QOF-AHAAN:**

Ka qaybgal Maxkamadda Guri Ka Saarida ee Hoolka  
Caddaaladda Degmada Jefeerson:

**600 West Jefferson St. Louisville, KY 40202 Room 308.**

**ISTICMAAL  
FOOMKEENA  
SI AAD UGU  
DIRTO E-  
MEEYL:**



Iyadoo CFH ay u doodo kiraystayaasha guryaha Kintaaki sida adiga oo kale, sharci-dejiyayaashu waxay sidoo kale u baahan yihiin inay ka maqlaan xisaabaadka gacanta koowaad(dadka ay arrintu saameeyso) si ay u fahmaan sida guriyeenta u saameeyso dad badan.

**QORAALKA  
WARQADDA  
AN KU  
TARJUN:**



- ISBAANISH
- SAWAAXILIGA
- FARANSIIS
- SOOMAALI
- FIYEETNAAM
- CARABIGA

